



Waxaan kuu rajeynayaa fasax nasasho leh

Diseembar 16, 2022

Qoysaska, ardayda, iyo asxaabta wada shaqaynta ee qaaliga ah,

Waxay ahayd farxad in aan booqno goobaha waxbarashada afartii bilood ee la soo dhaafay oo aan aragno ardaydeena oo dib ugu hawlan waxbarashadooda fasalka iyo hawlaha dugsiga. Waxaan ku faraxsanahay inaan arko ardaydeena oo la falgalaya facooda oo baranaya agab manhaj cusub.


Wakhtigan waxa uu ahaa wakhti wax soo saar badan Dugsiyada Dadweynaha Portland. Waxaan u mahadcelinayaa dhammaan xubnaha Kooxda PPS ee u heellan inay maalin walba shaqeeyaan si ay nidaamka dugsigeenna uga dhigaan mid ka sii wanaagsan oo xooggan.



Waxaan sidoo kale u mahadcelinayaa in bulshadeena ay diiradda saaraan baahiyaha ardaydeena. Waxaad maal galisay ardaydeena. Waxay ka faa'iideysanayaan helitaanka agab waxbarasho oo cusub, tignoolajiyad cusub, adeegyo taageero arday oo dheeri ah iyo dugsiyo badan oo la casriyeeyay. Hadafkeena waa in aan taageerno horumarka waxbarasho iyo wanaaga shucuureed ee arday kasta. Marka la eego dhacdooyinkii dhawaa, waa inaan sidoo kale ka fikirnaa, oo aan sii wadnaa qaadista, tillaabooyin firfircoon si aan si wanaagsan u ilaalino nabadgeliyada bulshooyinka dugsiyadeena.

Fasaxa jiilaalka ayaa soo dhow, sidaas darteed rajadayda waxay tahay in qof kastaa uu wakhtigan u isticmaali doono inuu ku nasto, dib ula xiriiro qoyska iyo asxaabta, iyo uu wakhti ku bixiyo samaynta waxyaabaha uu jecel yahay. Fasaxyadan dugsiga waxay kaloo caawiyaan koritaanka caafimaadka ardaydeenna, anagoo u samaynayna wakhti qoyska iyo taageerada kale ee bulshada.

Aniga ahaan, waxaan rajeynayaa inaan dib ula xiriiro qoyskayga, qaraabadayda, iyo carruurtayda oo dhamaantood koray. Wakhtigeena wada-jirka inta badan waxa aanu ku bixinaa cunto karinta, daawashada albammadii hore ee sawirada, iyo dib-u-sheekaynta sheekooyinka qoyska.



Waxaan rajeynayaa in waqtigan uu sidoo kale nasasho u noqon doono qof kasta oo idinka mid ah, waxaana rajeynayaa inaan dib u bilaabno shaqadeena muhiimka ah sanadka cusub.

Waxaan idiin rajeynayaa adiga iyo qoyskaaga xilli fasax oo ammaan iyo farxad leh.

Si daacad ah,



Guadalupe Guerrero

Kormeere